# Shan siyaaboodoo ad isu ilaalisid markaad shaqaale tahay

## *1) Heshiisku qoraal ha ahaado*

Sharciga gobolka BC kuma amrayo in aad heshiis la gasho madaxaaga shaqada. Hasayeeshee waxaa wanaagsan in aad isla meel dhigtaan faahfaahinta shaqada ad qabanaysid oo ah heshiis qoraal ah inta aadan shaqada bilaabin. Markaad saxiixaysid heshiis shaqo (employment contract) , hubi inaad ogoshahay wax kastoo ku qoran heshiiska. Nuqul (koobi) heshiiskaa hayso waa intaasoo ad isqabataan mustaqbalka qofka ad u shaqaysidi.

Haddii heshiiskaagu qorayo wax ka yar inta ugu yar ee xeerka sharciga shaqaalaha (employment standards law) ku cad, markaas waxaad xaq u leedahay in aad heshid inta ugu yar ee sharciga ku cad heshiisku wuxuu doono ha yiraahdee. Tusaale ahaan, haddii heshiiskaagu qorayo in lagu siinayo $5 saacaddii, waxaad wali xaq u leedahay $8 saacaddii marka la eego xeerka sharciga shaqaalaha gobolka BC.

## *2) Xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga markaad shaqaale tahay*

Marka la eego sharciga gobolka BC, waxaad leedahay xuquuqo cad. Waxaa ka mid ah inaad xaq u leedahay waqti cunto, lacagta saacadaha dheeraadkaa, lacagta maalmaha ciidaha sharcigaa (paid statutory holidays), lagaana badbaadiyo in lagugu shaqeeyo saacado xad dhaaf ah.

Shaqaale ahaan, adigana waxaa waajib kugu ah inaad timaadid waqtigii shaqada iyo in aad qaban kartid shaqadaada. Qofkaad u shaqaysidi waa ku cayrin karaa haddii ad mar walba shaqada ka soo daahdid (habsaantid) , shaqada si xun u qabatid, ama shaqada timaadid adoo cabsan (khamraysan).

## *3) Maalinta Mushaar Bixinta*

Shaqaale ahaan gobolka BC, waxaad xaq u leedahay lacag an ka hoosayn mushaarka ugu yar (minimum wage). Mushaarka ugu yari waa $8.00 saacaddiiba shaqaalaha badankooda, waase kordhi karaa mustaqbalka. Waxaad kaloo xaq u leedahay in lagu siiyo lacagta saacadaha dheeraadka ah ee ad shaqaysid.

Sharciga gobolka BC wuxuu qofka ad u shaqaysid ka rabaa inuu lacagta ku siiyo ugu yaraan laba jeer bishii. Qofka ad u shaqaysid waa inuu ku siiyaa warqadda lacag bixinta (pay slip) qoraal ah oo muujinaysa saacadaha ad shaqaysay, iyo lacagaha uu ka jaray mushaarkaaga. Sida sharcigu dhigayo, qofka ad u shaqaysid waa inuu mushaarkaaga ka jaraa lacagaha ay ka midka yihiin

canshuurta dakhliga, caymiska shaqa-la'aanta, iyo hawl-gabka.

Hubso inaad meel dhigatid warqadahaas lacag bixinta. Waxaad kaloo meel dhigataa qoraal ad ka samaysid saacadihii ad shaqaysay iyo faahfaahinta shaqooyinkii kale oo ad qabatay. Qoraaladaani waa caddaymo muhiim ah haddii aadan ku raacsanayn qofka ad u shaqaysid mushaarka ad ka qaadatay, adna doonaysid inaad ka dacwootid.

## *4) Fasaxyada iyo Maalmaha Ciidaha*

### Maalmaha Ciidaha Sharcigaa

Sanad walba waxaa ku jira 9 maalmood oo sharcigu leeyahay waa in shaqaaluhu helaan fasax lacagtii u socoto si ay ugu dabaaldagaan munaasabadahaa gaarka ah haddii ad shaqaysay saacada buuxa 15 maalmood oo ka mid ah 30 kii maalmood ee ka horreeyey maalinta ciidda. Waxaa kuwaan loo yaqaan maalmaha ciidaha sharcigaa (statutory holidays). Magacyada maalmaha ciidaha sharcigaa, booqo rugta-saabka (website - ka) waaxda sharciga shaqaalaha ah: www.labour.gov.bc.ca/esb/

Haddii ad ogoshahay, qofka ad u shaqaysidi wuxuu kaa codsan karaa in aad shaqaysid maalin ciid sharciya oo markaa ku siiyo maalin kale oo fasax ah baddalkeedii. Haddii maalinta ciidda sharciga ahi ay ku beeganto maalintii caadiyan ad fasaxa ka ahaan jirtay shaqada, waa in lagu siiyaa maalin kale oo fasax ah. Tusaale ahaan, haddii ad caadiyan fasax u ahaan jirtay Isniin, maalinta ciidda sharciga ahina ku beeganto Isniin, qofka ad u shaqaysidi waa inuu ku siiyaa maalin kaloo fasaxa oo lacagtaadii kuu socoto.

Haddii uu qofka ad u shaqaysid kugu adkeeyo in aad shaqaysid maalin ciid sharciya, waxaad xaq u leedahay maalintaa lacag dheeraada oo ka baxsan taadii caadiga ahayd. Lacagta dheeraadka ah oo loo yaqaan Lacagta Maalmaha Ciidda Sharcigaa (Statutory Pay) waa mushaarkaagii caadiga ahaa oo lagu dhuftay 1.5 dhammaan saacadaha ad shaqaysid ilaa 12 saacadood. Wixii ka badan 12 saacadood oo ad shaqaysid, qofka ad u shaqaysidi waa inuu ku siiyaa mushaarkaagii caadiga ahaa oo lagu dhaftay 2.

### Lacagta Fasaxyada

Ka dib 5 maalmood oo shaqaa, dhammaan shaqaalaha gobolka BC waxay xaq u leeyihiin fasax lacagtaadii kuu socoto. Ka dib markaad hal sano ka shaqayso saacada buuxa hal shaqo, qofka ad u shaqaysaa waa inuu ku siiyaa 2 asbuuc oo ah fasax lacagtaadu kuu socoto. Haddii ad wax ka sii badan isla shaqadii ka sii shaqayso saacada buuxa, qofka ad u shaqaysaa waa inuu ku siiyaa fasax dheeraad ah oo lacagtu kuu socoto, oo ay ugu badan tahay 3 asbuuc.

## *5) Shaqadaadoo ad ka tagtid*

### Fasaxyada kooban

Sida uu qabo sharciga gobolka BC, waxaad shaqada ka qaadan kartaa fasax kooban sabab xanuun awgeed, uur, iyo kadiso qoys, sida xanuun halis ah ama dhimasho xubin qoyskaa. Qofka aad u shaqaysaa waa inuu ku siiyaa waqtigaas fasax haseyeeshee mushaar inuu ku siiyo maaha inta aad shaqada ka maqan tahay.

### Shaqo ka tagis

Shaqadaada waad iskaga tagi kartaa markaad doontid adoon siin wax ogeysiin ah qafka ad u shaqayso, haddii aydaan isku ogeyn heshiiska shaqada in aad ogeysiis bixiso. Haseyeeshee haddii aad isku wanaagsanaydeen qofka aad u shaqayso, oo aad doonaysid in uu mustaqbalka warbixin fiican kaa bixiyo, waxaa wanaagsan in aad qofka aad u shaqayso siiso ogeysiin ku filan tagidaada si uu u helo badalkaaga.

Haddii aad shaqada iskaga tagto, qofka aad u shaqaysaa waa inuu kugu siiyo lacagtaad ku leedahay oo dhan 6 maalmood gudahood.

Haddii qofka aad u shaqaysaa go'aansado inuu ku cayriyo, waa inuu kuugu sii sheegaa qoraal ahaan. Kan waxaa loo yaqaanaa Ogeysiiska Cayrinta (Notice of Termination). Ka dib markaad hal sano ka shaqayso saacada buuxa hal shaqo, qofka aad u shaqaysaa waa inuu ku siiyo 2 asbuucoo ogeysiisa. Haddii aad wax ka sii badan ka shaqayso saacada buuxa halkaa shaqo, qofka aad u shaqaysaa waa inuu ku siiyaa ogeysiin ka sii dheer, ilaa iyo 8 asbuuc ugu badnaan.

Meeshii uu ku sii ogeysiin lahaa, qofka aad u shaqaysaa waa kaa joojin karaa shaqada hal mar, haseyeeshee, badanaaba waa inuu magdhaw ku siiyaa qadar lacaga intii kaa baaqatay. Tan waxaa badanaaba loo yaqaan lacagta magdhawga (severance pay). Sidii ogeysiinta, qadarka lacagta magdhawga qofka aad u shaqaysaa ku siinayaa waxay ku xiran tahay hadba intii aad meesha ka shaqaynaysay.

Waxaa intaa ka soo hara in qofka aad u shaqaysaa ku siiyo ogeysiis ama lacag magdhaw ah waa marka uu shaqada kaaga eryo "sabab xaq ah" ("just cause"). Tani waxay dhacdaa marka uu shaqada kaaga eryey falal aad u xun oo aad goobta shaqada ka geysatay, sida xatooyo, gacan-qaad aad shaqaale kale ama madaxdaada u geysatay, ama hantida shirkadda oo aad si ula kac ah u waxyeelaysay.

Qofka aad u shaqaysaa wuxuu haystaa 48 saacadood marka laga bilaabo waqtiga uu ku eryo in uu kugu siiyo lacag wixii aad ku leedahay.

## *Markaad dacweynaysid qofka aad u shaqayso*

Haddii ay kuu suurtoobi weydo in aad si toos ah xal ugu hesho dhibaatooyinka shaqo ee ad ka tirsanayso qofka aad u shaqayso, waxaad ku dacweyn kartaa inuu ku xadgudbayo sharciga shaqada gobolka BC. Haddii ay Waaxda Sharciga Shaqadu (Employment Standards Branch) go'aamiso in qofka aad u shaqaysaa meel uga dhacay shuruucda shaqada, waxay ku ganaaxi karaan inta u dhaxaysa $500 iyo $10,000 markuu sharciga jabshaba. Ganaaxu waa sii kordhaa mar kastoo uu sharciga jabshaba, sidaa darteed qofka aad u shaqaysaa wuxuu danaynayaa in uu raaco shuruucda shaqada gobolka BC oo loogu talagalay in lagu badbaadiyo xuquuqda shaqaalaha.

Haseyeeshee aday kugu xiran tahay in aad ka shaqaysiisid xeerka sharciga shaqada. Sii raadi shuruucda la xiriirta xuquuqdaada shaqada. Waxaad macluumaad dheeraad ah ka heli kartaa rugta-saabka (website - ka) Waaxda Sharciga Shaqada ah: http://www.labour.gov.bc.ca/esb/

Rugta-saabkoodu (website-koodu) wuxuu ku siinayaa macluumaad dheeraad ah oo la xiriira Xeerka Sharciga Shaqada gobolka BC. Rugta-saabkoodu waxaa kaloo u leeyahay macluumaad ku qoran afaf kale. Haddii aadan akhriyi karin afafkaas midkoodna, weydiiso saaxiibkaa ama hawlwadeenka dajintu in uu kuu macneeyo macluumaadka.

Immigrant PLEI Consortium

**Mashruucaan waxaa lagu suurtagaliyey maalgalinta Dawladda Dhexe ee Kanada iyo Gobolka Biritish Kolombiya.**